

Liiska iska hubinta covid-19 ka hor ka qaybgalka hawlaha FFA

Foomka waxa loo sameeyey hubinta in dadka ka qaybgalaya joogitaanka ama maalmaha fasaxu aanay qabin covid-19 (koroona).

Si loo yareeyo khatarka is-qaadisiinta xanuunka ee martida joogta waxannu diyaarinay liiska iska hubinta Covid-19. Ka hor intaanad ka qaybgelin joogitaan ama hawl hoos timaada Laanqyerta Cas, waxannu rabnaa in adiga iyo qoyskaagu ka jawaabtaan foomkan. Su'aalaha **dhammaantood** waa in laga jawaabo.

Haddii adiga, ama qof ka tirsan qoyskaagu, haa ku jawaabtaan hal ama dhowr ka mid ah su'aalahan, waxannu kaa codsanaynaa inaad u sheegtid Laanqeyrta Cas.

Ma qabtaa calaamado ay ka mid yihiin cune-xanuun, qandho, duray ama qufac fudud?	HAA / MAYA
Guri ma la degantahay qof laga helay ama ay u badantahay inuu qabo covid-19?	HAA / MAYA
Miyaad 14-kii maalmo ee u dambeeyey in ka yar 2 mitir ma u jirsatay oo ma ag taagnayd in ka badan 15 daqiiqo oo wada socda qof laga helay covid-19?	HAA / MAYA
Miyaad ku jirtaa karantiimo sababteedu tahay covid-19?	HAA / MAYA
Miyaad 14-kii maalmo ee u dambeeyey si toos ah u taabatay qof laga helay covid-19?	HAA / MAYA

Ogow: Haddii aad dareemayso calaamada ay ka midyihiin cune-xanuun, qandho, duray ama qufac fudud xilliga aad joogto/ku jirto hawlaha, waxannu kaa codsanaynaa inaad sida ugu dhakhsaha badan u sheegtid mid ka mid caawiyeyaasha.

Macluumaad iyo talooyin toos ah oo ku saabsan fayrasta koroona waxaad ka helayaa fhi.no iyo helsenorge.no

Haddii aad weydo jawaabta su'aasha aad qabto, waxaad wici kartaa telefoonka macluumaadka oo ah **815 55 015** oo furan maalmaha shaqada, saacadaha 08-15.30.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan app-ka Smittestopp, waca Helsenorge oo telefoonku yahay 23 32 70 00.

Haddii aad u baahatid gargaar caafimaad oo degdeg ah, wac dhakhtarkaaga. Haddii aad heli weydo dhakhtarkaaga, wac cisbitaalka degdegga ah oo telefoonkiisu yahay 116117. Haddii nafta ama caafimaadku halis ku jiro, wac 113.